Ardayda Aan Qalin Jabineynin Waxbarashada Afarta Sano ee Dugsiga Sare Kadib

Ardayda aan waafaqin shuruudahooda qalin Jabinta ee dugsiga sare ISLAMARKAANA aan kasbanin dibloomaha rasmiga ee dugsiga sare ayaa waxay xaq u yeelanayaan in ay si lacag la'aan ah ugu helaan waxbarashada lacag la'aanta ee dadweynaha isla sanad dugsiyeedka gudihiisa ee ay ku noqonayaan 21 Jirka. Marxaladan waxaa ka mid noqon doona oo kale kuwa dadoodu ka hooseyso 21 ee kasbaday shahaadada dhameystirka waxbarshaaa dugsiga sare ee GED ama haddii ay yihiin kuwa isu diiwaangaliyey:

- Barnaamiijyada shaqada iyo waxbarashada farsamada oo ay ka mid yihiin xarumaha xirfadaha;
- Barnaamiijyada barashaag labada luuqadood ee kala guurka;
- Barnaamiijyada waxbarashada khaaska; ama
- Barnaamiijyada waxbarashada kuwa soo – haajirayaasha.

Dugsiyada sare iyo dugsiyada degmooyinku waxay sii wadan doonaan helitaanka Qondeynta Waxbarashada Aasaasiga (Basic Education Allocation (BEA)) iyo dhaqaale kale oo kasta oo ay ardaydan ay soo saaraan.

Ardayda aan qalin jabin doonin waxbarashada afarta sano ee dugsiga sare kadib waxaa kale oo ay yeelanayaan door bidasho kale oo lacag lagaga bixinayo haddii ay door bidaan in aaney kusoo laabanin dugsiga sarefursadaha door bidashadaas waxaa si faahfaahsan laga damabeysiyay fursadaha door bidashada sida lacag la'aanta ah.

FURSADAHA DOOR BIDASHADA LACAG LA'AANTA

Fursada door bidashada ee lacag la'aanta waa kuwo loogu talo galay ardayda aan qalin Jabineynin waxbarashada afarta sano ee dugsiga sare kadib ee dooonaya in ay waafaqaan shuruudahooda qalin Jabinta ee dugsiga sare. Fursadaha door bidashadu waxay yihiin:

1. **Kasii qeyb Galka Sida Joogtaada Waxbarashada Dugsiga Sare:** Dhamaan ardaydu Waxay xaq u yeelanayaan in ay ka soo xaadiraan waxbarasha dooda dugsiga sare ee deegaanka inta laga gaadhayo dugsi sanadeedka ay ku noqonayaan 21 jirka.

2. **Ka Qeyb Galka Barnaamiijka Dhameystirka Dugsiga Sare ee Dugsiga Degmada:** Degmooyinka dugsiyada waxaa laga yaa'ba in ay la xidhiidhaan kuuliyadaha deegaanka si ay u fidiyaan waxbarashada lacag la'aanta ee barnaamiijyada dhameystirka waxbarshada dugsiga ee loogu talo galay ardayda wali wax kasii dhiganaya dugsiga degmada ee deegaanka kadib marka la dhameystiro barnaamiijka, ardaydu waxay ka helayaan degmadaas dibloomaha dugsiga sare.

3. **Kusii Wadista Bilaabitaanka Orodka:** Ardayda ka qayb qaadanya Bilaabitaanka Orodka wagtiga ay dhiganayaan fasalada 11aad iyo 12aad ee sanad dugsiyeedadooda laakiinse aan dhameystirin fasalada looga baahan yahay shuruud ahaanta qalin jabinta dugsiga sare waxaa surtagalka noqon karta in looga baahnaado in ay sii wataan ka qeyb qaadashadooda Bilaabitaanka Orodka si ay u waafaqsanaadaan shuruudahooda qalin jabinta dugsiga sare ee ka sareya fasalka 12 aad, laakiinse in ay ku qaataan oo kaliya fasaladaas Bilaabitaanka Orodka ee ay ku guul dareysteen ama aaney u dhameystirin sidii ugu habooneyd. (Barnaamiijka Bitalitaanka Orodka waxaa uu u ogolaanayaa in ardayda u qalanta ee fasalada 11 aad iyo 12 aad ay qaataan waxbarashada kuliyada ee sida bila lacagta ah iyaga oo ku helaya fasaladaas dhibaha dugsiga sare iyo kuwa loogu talo galay heerka kuuliyadeed.)

Fursadaha Door-Bidashada ee Ardayda Aan Ku Qalin Jabineynin Waxbarshada Dugriga Sare ee Afarta Sano Kadib (socda)

FURSADAHA LACAG BIXINTA

Fursadaha lacag bixinta waxaa diyaarka looga dhigay ardayda kuwa aan ku qalan jabineynin waxbarashada dugsiga sare ee afarta sano kadib ee u baahan in ay waafaqaan shuruudahoooda qalin jabinta ee dugsigooda sare. Fursaduhuna waxay yihiin:

1. **Kuwa isu diwaangaliya Barnaamiijka dhameystirka Waxbarashada Deegaanka iyo Kuuliyada Farsamada Dugsiga sare:** Tiro ka mid ah kuuliyadaha deegaanka ee ka jira dawlad gobaleedka waxay bixiyaan barnaamiijyada dhameystirka waxbarashada dugsiga sare haddii ardaydu ay haaystaan dibloomaha dugsiga sare ee kuuliyada. Ardaydu waxaa ku waajib ah in ay ka tanaasulaan waxbarashadooda degnaanshaha dugsiga sare si ay isu qoraan barnaamiijyadan. Marxaladaha intooda ugu badan ardayda waxaa lagu waajibiya in ay bixiyaan khrashka wax barista iyo lacagta is diwaangalinta, inkastoo kuuliyaduhu ay haaystaan. Awooita ay, kaga tanaesulaan kharashka waxbarashada iyo, kharashayada isdiwaangalinta ee ardayda da'doodu 19Jirka tahay iyo inta ka sareysaba. Ardayda u dhaxeysa 16 Jirka ilaa 18 Jirka waxaa ku waajib ah in ay ka haaystaan ogolaanshaha fasoxa ka tagista oo saxeexan dugsigooda degmada ee deganaanshaha si ay isu qoraan barnaamiijka dhameystirka waxbarashada dugsiga sare ee heerka kuuliyadeed ee deegaanka.

2. **Sii Waditaanka Shahaadada Horumarinta Waxbaras hada guud (GED):** Ardayda 16 Jirka iyo inta daadoodu kasareysaba waxaa surtagal ah in ay ku kasbadaan shahaadada GED ku gudbitaanka dhamaan imitixaanada isdabajooga ah ee lagu siiyo bannaamiiJka GED. Si ay u qaataan imitixaanada, waa in ay ardaydu ka tanaasulaan dugsigooda sare ee deganaanshaha. Deegaanka dawlad gobaleedka iyo kuuliyadaha farsamada ayaa waxay yihiin xarumaha rasmiga ee lagu qaado imitxaanada rasmga ee la xidhiidha GED. Ardaydu waxay bixinayaan kharashyada imitixaanaadka islamanahaantaana waxaa surtagal ah in ay bixiyaan kharashka waxbarashada iyo kharashka koorasyada diyaargaroowga GED ee lagu fidiyo degaanka iyo kuliyadaha farsamada. Shahaadadu urna dhiganto dibloomaha dugsiga sare, iyada oo ardayda hesha shadaadada GED loo tixgalinayo sida katanaasulayaal oo kale ujeedooyinka uqalmanaanshaha dugsidga sare awgeed. Haseahaatee, ardayda dandoodu ka hooseyso 21 jirka ee islamarkaaasna haaysta shahaadada GED ayaa waxay alaaba buuxin karaan shuruudahooda qalin jabinta dugsiga sare iyo in ay helaan dibloomah. (Eeg Fursadaha Lacag La'aanta Qod. 1 iyo 2 ee sare)

3. **Isu-diwaangalinta kuuliyada Dadweyanha Labada – ama kuuliyada ama Jaamacada Afarta – sano**: Kuuliyadaha dadweynaha ama Jaamacadaha ka Jira washington dhamaantoodu kama dhigaan shardi in ay ardayan haaystaan dibloomaha si loo qaabilo, inkastoo dibloomaha dugsiga sare u kordhinayo fursadaha qaabilaada loogu ogolaanayo ardayga in uu ku biiro xarunta waxbarashada dawlad gobaleedka ee ka kooban mudada waxbarashada afarta sano. Ardayga aan haaysanin dibloomaha dugsiyada sare oo isuqora kuuliyadaha ama Jaamarcadaha waxaa uu ardayda kale looga baohan yahay in ay bixiyaan kharashka guud ee waxbarashada ama iyo kharashyada kale ee Jiraba. Ardayda aan haaysanin dibloomaha dugsiga sare ama shahaadada GED waxaa surtagalka noqon kanta in aaney ugu qalmin qaar ka mid ah kaalmooyinkq heerka federal, dawlad gobaleed iyo kaalmada xarumaha maalyadeed ee madaxa banaan.